# Daawooyinka loogu talagalay Cilladda Isticmaalka Opioid-ka iyo Naas-nuujinta



Waa ammaan in la nuujiyo ilmahaaga adigoo qaadanayana dawooyinka xanuunka isticmaalka opioid.

## Waa maxay dawooyinka loo adeegsado Cillada Isticmaalka Opioid-ka (MOUD)?

Daawooyinka loogu talagalay Cillada Isticmaalka Opioid-ka (MOUDs) ayaa ah dawooyin dhakhtarka uu qoro si looga caawiyo dadka inay joojiyaan isticmaalka opioids-ka.

Methadone iyo buprenorphine (Subutex®) waa daawooyinka ugu waxtarka badan ee dadka isku dayaya inay joojiyaan isticmaalka opioids-ka sababtoo ah waxay yareeyaan calaamadaha ka-noqoshada iyo rabitaanka opioid-ka. Methadone ama buprenorphine waa qayb muhiim ah oo ka mid ah daaweynta Cillada Isticmaalka Opioid-ka (OUD). Waxay kaa caawin karaan adiga iyo ilmahaaga inaad caafimaad qabtaan. Methadone iyo buprenorphine waa ammaan in la qaato marka la nuujinayo. Buprenorphine-naloxone (Suboxone®) sidoo kale waa ammaan.

Naltrexone (Vivitrol®) waa daawo kale oo loo isticmaalo in lagu daweeyo cillada isticmaalka opioid-ka. Ma aha mid waxtar leh sababtoo ah ma yaraynayso calaamadaha ka-noqoshada ama rabitaanka, laakiin waxay ammaan u tahay laabta/naaska nuujinta.

## MOUD-yada ma geli karaan caanaha dadka?

Haa. Qadar yar oo MOUDs ah ayaa gala caanahaaga. Qadarka methadone ama buprenorphine ee ilmahaag gaara marka naaska la nuujinaya aad ayay u yar tahay. Way ka yar tahay waxa ilmahaaga la siin lahaa haddii ay yeeshaan calaamadaha ka-noqoshada kadib markay dhashaan. Naas-nuujinta inta aad qaadanayso MOUDs ayaa u roon ilmahaaga marka loo barbardhigo inaadan naaska nuujin.

## Waa maxay saamaynta ay naas-nuujinta ku leedahay marka aad MOUDs qaadanayso?

- Nuujinta  marka la qaadanayo MOUD waa u ammaan adiga iyo ilmahaaga.
- Ilmahaagu ma la qabsan karo MOUD's xiliga naas-nuujinta.
- Dhallaanka laabta/naaska la nuujiiyo uma badna inay u baahdaan dawooyinka ka bixitaanka kadib markay dhashaan.
- Haddii aad qaadato methadone, marka aad joojinayso naas-nuujinta waxaa fiican inaad si tartiib ah u joojiso laabta/naas nuujinta. Si dhif ah, dhallaanku waxay yeelan karaan calaamadaha ka-bixitaanka haddii aad si lama filaan ah u joojiso naas nuujinta.
- Haddii aad qaadato buprenorphine, naltrexone ama buprenorphine-naloxone, uma baahnid inaad si tartiib ah u joojiso naas nuujinta.

## Ilaalinta caafimaadkaaga iyo badbaadada ilmahaaga

- Qaado fitamiino badan oo iodine leh oo cun miraha iyo khudaarta midabada dhalaalaya leh si aad u kordhiso nafaqada caanahaaga.
- La hadal daryeel-bixiyaha caafimaadka ee ilmahaaga haddii ilmahaagu uu ka hurdo badan yahay sida caadiga ah, ay ku adag tahay wax cunida ama uu qabo calool-fadhi.
- Iska ilaali inaad hal sariir la seexato ilmahaaga. Habka ugu badbaadsan ee hurdada waa in aad isla qolka kula wadaagto ilmahaaga sariirtooda.
- U Kaydi MOUDs si ammaan ah. Tani waxay si gaar ah muhiim u tahay haddii socod barad ama carruur kale ay guriga joogaan.
  - **Haddii aad u malaynayso in ilmahaagu laqay MOUDs**, ka wac Poison Control (Qeybta Xakamaynta Sunta) 800-222-1222.
  - **Wac 911** haddii ilmahaagu uu neefsigiisu yar yahay, uu joojiyo neefsashada, ay adag tahay inuu tooso, uu leeyahay maqaar ama faruuryo buluug u eg, uu caajis yahay, hurdo badan yahay, ama uu leeyahay matag iyo/ama shuban aan joogsanin.



## Ka waran haddii la ii sheego inaan ilmaha naas nuujinin sabab la xiriirta inaan qaatay MOUD?

Daryeel-bixiye caafimaad oo kuu sheegaya inaadan naaska nuujin ilmahaaga sabab la xiriirta inaad qaadatay MOUD si khaldan ayuu macluumaad khaldan u haystaa. Weydii daryeel-bixiyahaaga haddii ay jiraan sababo kale oo ay u maleynayaan inaadan xabadka/naaska nuujinin ilmaha. Go'aaminta sida loo quudiyo dhallaankaaga waa go'aankaaga. Haddii aad dareento in daryeelka lagu siinayo uu yahay mid ixtiraam darro ah waxaad waydiisan kartaa daryeel-bixiye kale ama waxaad ka dacwoon kartaa rugta caafimaadka ama isbitaalka.

Naas-nuujinta iyadoo la qaadanayo methadone ama buprenorphine waxaa ansixiyay Kulliyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Dhallaanka iyo Dhakhaatiirta Haweenka, Akademiyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Carruurta, Ururka Caafimaadka Haweenka, Dhallaanka, iyo Kalkaaliyaasha Dhallaanka, Ururka Caafimaadka Adduunka, iyo Akademiyada Daawada Naasnuujinta.

## Haddii aan qaato MOUDs inta aan uurka leeyahay, ilmahaygu ma yeelan doonaa calaamado ka-noqosho ah kadib markay dhashaan?

Haddii aad qaadato methadone ama buprenorphine inta aad uur leedahay, ilmahaagu waxa laga yaabaa inay yeeshaan calaamadaha ka-bixitaanka kadib markay dhashaan. Ilmahaagu waxa kale oo uu u baahan doonaa in uu ku jiro cisbitaalka dhawr maalmood oo dheeraad ah.



Markaad umusho/dhasho, nooca ugu wanaagsan ee daryeelka ee loogu talaglaay adiga iyo ilmahaaga waxaa lagu magacaabaa Cunida, Hurdada iyo Kansoolka. Daryeelkan waxaa ka mid ah:

- Inaad adigga iyo cunugaagu isku qol joogtaan
- In qolka laga dhigo mid aan buuq lahayn iyadoo iftiinka la gaabinayo.
- Luqidda iyo qabashada ilmahaaga.
- Nuujinta ilmahaaga ama inaad maqaarka-maqaarka saarto inta aad masaasada siinayso.

Dhammaan isbitaallada ma bixiyaan daryeelka Cuntada, Hurdada iyo Kansoolka. Si aad u ogaato haddii cisbitaalka aad qorshaynayso inaad ku dhasho uu bixiyo daryeelka Cuntada, Hurdada iyo Kansoolka waxaad:

- Weydiin kartaa daryeel-bixiyaha caafimaadkaaga haddii cisbitaalka aad rabto inaad ku dhasho uu bixiyo daryeelka Cuntada, Hurdada iyo Kansoolka.
- Waxaad wici kartaa lambarka ugu weyn ee isbitaalka oo waxaad weydiisan kartaa xiriiriyaha qeybta hooyada (tani waxaa mararka qaarkood loo yaqaan qeybta/dabaqa 'postpartum',' antepartum' ama 'ilmaha hooyada'). Mid kasta oo ka mid ah kalkaaliyayaasha shaqeeya waa inay ogaadaan haddii ay bixiyaan daryeelka Cuntada, Hurdada iyo Kansoolka.
- Haddii aad awooddo, dooro inaad ku dhasho cisbitaal bixiya daryeelka Cuntada, Hurdada iyo Kansoolka. Taasi waa nooca ugu wanaagsan ee daryeelka loogu talagalay adiga iyo ilmahaaga.

---

*Dadku waxay isticmaalaan erayo kala duwan si ay u qeexaan xubnaha jirkooda. Qaar ka mid ah waalidiinta laba jinsiyoodka aha ama aan jinsi cayiman lahayn waxay isticmaalaan ereyga “xabadka/ laabta” halkii ay ka isticmaali lahaayeen “naaska.” Dukumeentigan, waxaan isticmaalnaa naas nuujinta iyo nuujinta xabadka waana erayo la isku bedeli karo oo isku macno ah. Naasnuujintu waa hannaan bayooloji ah oo jirkaagu ku sameeyo caano si loogu quudiyo dhallaanka.*

Washington State Department of HEALTH

DOH 349-057 May 2023 Somali

Si aad dukumiintigaan ugu heshid qaab kale, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolaha ah ama kuwa maqalkoodu culus yahay, fadlan wac 711 (Washington Relay) ama iimayl u dir civil.rights@doh.wa.gov